Siyaasadda JLCE- Gargaarka Degdega ah iyo Daryeelka Caafimaadka ee Degdega ah

Shilalka Ardayga ama jirooyinkiisa

Ma jirto daawayn dhaawac ah oo loo oggolaanayo dugsiyada aan ka ahayn gargaarka degdega ah. Gargaarka degdega ahi waa midka caawimaadda dhakhsida ah taasi oo uu bixiyo qofka ugu xirfad fiican ee markaasi jooga haddii ay dhacaan shil ama jiro kadis ah.

Waa caadi waana mid sharci u ah shaqaalaha dugsigga in uu bixiyo daryeelka degdega ah ee ardayda jiran ama dhawaac soo gaara markasta oo ay jiro ama dhaawac ka dhacaan shaqaalaha dugsigga meel uu joogo sida dhismaha dugsigga, basaska dugsigga, meel kasta oo ka mid ah meelaha hoos yimaada ilaalada dugsigga ee dhismaha dugsigga kamid ah, ama kuyaala dhinaca deegaanada dugsigga.Markasta oo ay baska dugsigga gudihiisa kadhacdo xaalado degdeg oo halis ah, daraawalka baska ayaa isla markiiba u ka xaynaya isbitaalka ugu dhow si uu u helo daryeel daawayn oo degdeg ah.

Wakhti kasta oo ay noqoto majiri doonto wax daroogo ah oo la siinayo oo aan ka ahayn haddii ay xaaladu tahay suuxid markaas oo la adeegsan karo aalkolo udgaysa oo ka samaysan dareeraha amooniya. Isticmaalka kaniiniga asbirinka oo loo qaato madax xanuunyada ama siinta karboonka labbaad ee soodiyomka waa mid ay reebantahay.

Maamulayaasha iyo madaxda qaybta ayaa masuul ka noqon doona barida shaqaalaha qayb kasta siyaasadaha iyo nidaam hawleedyada sida loola dhaqmo jirooyinka iyo dhaawacyada ku lugta leh ardayda. Ugu yaraan dhismo kasta hal qof ayaa loo tababaray gargaarka degdega ah.

Kaarar macluumaad oo degdeg ah oo ay iska leeyihiin dhammaan ardayda ayay waalidiintu ama mas’uuliyiintu buuxin doonaan sannad kasta wakhtiga ardaydu la qorayo wuxuuna ahaan doonaa fayl xafiisyada dugsigga yaala.

Marka ay kooxaha ciyaaruhu ka qaybqaadanayaan ciyaaro kadhaca meel kafog dugsigga gurigooda, tababareyaasha ayaa haysan doona nuqulo isku mid ah oo ah kaararka degdega ah oo ay iska leeyihiin dhammaan ciyaartoyda ka qaybqaadanaysa ciyaarta.

Markasta oo ay xaaladu u baahantahay daryeel dheeri ah oo kafog hawlaha dugsigga lagu bixiyo, tixraacyada ku qoran kaararka degdega ah waa in lala xariiraa. Marka aan liiska kaarka degdega ahi uusan ku jirin qof wayn oo lala xariiri karo ama haddii daryeel degdeg ah loo baahdo kaas oo aan wakhtigu oggolaanayn in lasameeyo taleefoono badan, xubin ka mid ah shaqaalaha kaas oo markaasi mas’uuliyada haya ayaa laga wici karaa lambarkaan 911 kadibna ka codsanaya Magaalada Denver iyo Kooxda Dab damiska ee Dowladda hoose, wuxuuna siinayaa magaca qofka iyo cinwaanka dhismaha dugsigga , iyo xaalada haddii loo baahan yahay gaariga dhaawaca lagu qaado.

Kooxda dab damiska ee jooga meesha ugu dhow ayaa ka jawaabi doona taleefoonka degdega ah haddii la codsado gaariga dhaawaca lagu qaado waxaa laga soo diri doonaa Caafimaadka Denver iyo Isbitaalada. Qofka dhaawacmay ama jiran waxaa loo qaadi doonaa qolka xaalada degdega ah ee isbitaalka ugu dhow. Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Denver ayaa raaci doona ardayga haddii aan waalidku/mas'uulka meesha joogin.

Nidaam hawleedyadan ayaa loo raaci doonaa dhammaan xaaladaha degdega ah ee la xariira ardayda dugsigga dhigata,,Hawlaha uu dugsigga-maalgelinayo iyo dhacdooyinka ciyaaraha ah illaa uu takhtar ka joogo maareynaya xaaladahaas degdega ah oo kale.

Mas'uuliyada maareynta gargaarka degdega ah*

Xaddidaada maareynta munaasibka ah iyo mida aan munaasibka ahayn ee gargaarka degdega ah ee xaalad kasta oo degdeg ah oo uu yahay, tijaabinta mas'uuliyada la dabakhaayo waa mida ku saabsan waxa uu qofka caqliga lehi ee caadiga ah uu ku qalabaysanyahay sida aqoonta shaqaynaysa duruuftaasi ama mid ayada la mid ah oo kale.

Cunsurka degdega ahi dhab ahaantii waa in uu meesha yaalo dhaawaca mudada-dheer ahna ama jirada ama dhacdo aan degdeg ahayn ma sababayso maareynta gargaarka degdega ah ama si gooni ah wax kasta oo loo malaynayo in ay tahay koorso daawayn oo socota.

Caadi ahaan xaalada deg dega ah ama shilka,waxa jira waajib lagu awoodayo samaynta gargaarka degdega ah ee macquul ah. Su'aasha ah in gargaarka degdega ahi loo maareynayo qaab daryeel la'aan ah waa su'aal run ah taas oo xukumaysa heerarka uu yahay qofka caadiga ah ee caqliga lehi kaas oo leh aqoonta duruuftan ama mid ayada oo kale ah uu ku maareyn karo.

Qofku ma ahan mid loo baahanyahay in uu ka baqo mas'uuliyadda maareynta gargaarka deg dega ah hadiiba ay meesha jirto xaalad deg deg ah hadii uu qofku joogo meelooyin caadi ah ee gargaarka deg dega ah una sameeya waxa uu samaynayo qaab niyad wanaaga ah iyo weliba asaga oo adeegsanaya aqoontiisa ugu fiican iyo awoodda uu markaasi awoodo. Meesha waxaa jiri doona khatar badan oo la xariirta taxadirka aadka ah taasi oo ku aadan ka cabsashada uu qofku ka baqayo in uu ku fashilmo maareynta gargaarka degdega ah marka uu shilka dhaco halkii uu asaga ka maareyn lahaa gargaarka degdega ah.

Hadddii xaalada degdega ahi ay tahay mid aad halis u ah, hadaba shayga ugu horreeya ee la samaynayo waa in loo yeero takhtar ama anbalaaska magaalada ay la jirto ku wargelinta waalidiinta. Sida la ogyahay, marba haddii ardayga lagu wareejiyo dowladda caafimaadka dadweynaha, mas'uuliyada qofka ee daawaynta gargaarka degdega ahi waa mid istaagaysa.

**Waxaa laga soo qaatay ra'iyi uu bixiyay looyarka Dugsiyada Dadweynaha Denver, 25 Janaayo, 1965*

Qaybaha waxaa la bilaabay 1 Sibteembar, 1965, 16 Agoosto, 1974 iyo 17 Diseembar , 1976
Loo muraajaceeyay si loo waafijiyo habdhaqanka: taariikhda ansixinta buuga tusaalaha bixiya
Faylka: JLCE

TIXRAACA SHARCIGGA.: C.R.S. 13-21-108
C.R.S. 24-10-106.5

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: JLIB, Burinta Ardayga Kahortaga ah
JLCD, U maarEynta Daawooyinka Ardayda